



**Akoonka dadka VIP-ga ah**

*my* **Bank**  
Wherever you go

Koontada noocan ah waxaa loogu talagalay dadka muhiimka ama labeenta u ah bulshada, ha ahaadeen dumarka ganacsatada ah, ragga ganacsatada ah, cilmi-baarayaasha, Macallimiinta sare ee Jaamacadaha , odayaasha dhaqanka, hogaamiyayaasha diinta iyo kuwa u dhaqdhaqaaqa bulshada rayidka. Xisaabta noocan ah waxay si gaar ah u daboolaysaa baahiyaha bangi ee gaarka u ah qaybahaas bulshada ka muuqda.

Koontadan ayaa wadata adeegyada jeegga, Internet banking, Mobile banking, QR code powered payments iyo bixinta biilasha lagu soo dallaco macmiilka si online ah.

Maadaama dadka noocan ahi ay badanaa mashquul yihiin, waxaa akoonkani leeyahay hab sahlan oo akoonka lagu maamulan karo sida e-mail iyo taleefan iyada oo aan marnaba hoos loo dhigayn dhawrista ammaanada macmiilka.

## Faa'iidooyinka Akoonkan:

- Waxaad kaga adeegan kartaa ama lacag ku siin kartaa dukaammada, Maqaayadaha, Xafiisyada dawladda, Shirkadaha gaadiidka, Hoteellada, Jaamacadaha, Telefishinnada, Iskuullada IWM.
- Jeeg buug ka kooban 50 xaashi.
- MasterCard debit aad u adeegsan karto transactions-ka gudaha iyo kuwa dibedda labadaba.
- Statement ga akoonkaaga oo si bille ah laguugu soo diro si otomatik ah.
- Si sahlan oo lacago lagaaga soo diri karo, isla markaana aad ugu dirsan karto dibedda, adiga oo adeegsanaya adeegga Swift iyo kannaallada kale ee casriga ah ee lacagaha la isugu diro.
- Amar lacag-bixin joogto ah oo aad hal mar bixi karto, deedna bil ama sitimaan kasta si otomatik ah lacagtii looga wareejinayo akoonkaaga, lana dhigayo akoonka ciddii aad dalbatay in lagu wareejiyo. Lacagaha aad habkan ku wareejin karto waxaa ka mid ah biilka qoyska IWM.
- Waxa aad si bilaash ah uga faa'iideysan kartaa warbixinnada dhaqaalaha dalka ee bankigu diyaariyo, iyo talooyinka ganacsi ee bankigu bixiyo.
- Internet iyo Mobile banking kuu sahlaya in aad akoonkaaga maamulato goor kasta iyo goob kasta oo aad joogto.
- SMS lagugu soo wargelinayo dhamaan transactions-ka ka dhaca akoonkaaga.

- 24-ka saac iyo 7-da maalin ee sitimaanka oo aad si online ah ula sheekaysan karto shaqaalaha bankiga, si ay kaaga caawiyaan wixii cillada, cabasho ama su'aal ah ee aad qabto. Shaqaalaha bankiga waxa aad kula hadli kartaa website-ka bankiga, Facebook iyo WhatsApp.
- In aad lacagahaaga kala bixi karto ATM-yada bankiga.
- Waxaa lagu samaynayaa qof aad si gooni ah ugala soo xiriirto dhamaan waxyaalaha aad bankiga uga baahato.
- In aad adeegyada bankiga si sahlan uga heli karto wakiilladeena ku firirsan meelo badan oo dalka ah.
- Akoonkaaga oo aad ku maamulan karto e-mail kaaga ama taleefankaaga adiga oo bankiga ka codsanaya fulinta adeegyo bank.
- In aad ka faa'iideysan karto maalgelinta bankiga.

## Shuruudaha Furista Akoonkan:

1. National ID, Passport ama document kale oo ay ansixiyeen hay'adaha ku shaqada leh.
2. Cinwaanka ama deegaanka macmiilka.
3. In macmiilku caddeyo meelaha dakhligu ka soo galo.
4. Sawirk-ka macmiilka.



 7777  +252 1 847777 | +252 62 3737777

 +252 61 3737777

 [info@mybank.so](mailto:info@mybank.so)

 [www.mybank.so](http://www.mybank.so)

  [MyBank.so](https://www.facebook.com/MyBank.so)

 [MyBankso](https://twitter.com/MyBankso)

Head Office / Branch Location  
Mogadishu, Somalia

